

# Fuuleyaasha Baaskiilka!

**Da'daadu waxay doonto ha ahaato ama intaa doonto fuul oo wad, nabadgelyadaadu waa muhiim.**

**TARGET  
ZERO**

Inteena badan, ama gaari aan ku jirno ama baaskiil aan saarnaano, waxaa la isku raacsanyahay kulligeen in aan wadaagno masuuliyadda nabadgelyada nafteena iyo kuwa kale ee waddooyinkeena maraya. Markii baaskiil la saaranyahay, waxaad ku caawisaa wadada inaad uga dhigto ammaan naftaada iyo kuwa kale habraacyadaan nabadgelyada:

**Xiro Koofiyad  
Baaskiil**



**Noqo Mid La  
Arki Karo**



**Noqo Mid La  
Filan Karo**



**Feejignow**




# Xiro Koofiyad Baaskiil

Koofiyaduhu waxay yareeyaan dhaawacyada madaxa iyo maskaxda ee halistaa. Raadi koofiyad raaxo leh oo hagaaji si ay u le'ekaato – sax baa u heshay markay dhagan tahay, madaxaaga ku simantahay, oysan dhinac dhinac ama hor iyo gadaal u dhaq-dhaqaaqin.



# Noqo Mid La Arki Karo



Inaad ahaato qof si sare u muuqda waxay ku caawisaa darawallada in ay dhaqso kuu arkaan, taasoo siisa waqti badan oy ku falceliyaan. Nalalka hore, nalalka dambe, dhar iftiin badan iyo waxyaalaha markii nalku qabto muuqda waxay u sahlaan dadka kale in ay arkaan fuuleyaasha baaskiilka.

# Noqo Mid La Filan Karo

Raacidda sharciyada taraafiga iyo isticmaalidda ishaarooyinka gacmaha waxay u sheegaan darawallada meeshaa u socotid.

**Bidix**



**Midig**



**Joogsi**



# Feejignow



Ha u oggolaan foonkaaga, tiknoolajiyadda baaskiil ka-xeynta, ama sameecadaha dhegahaaga inay feejignaantaada ka qaadaan baaskiil-wadistaada. Markaad digtoontahay oo la socotid waxa kugu hareereysan, waxaad tahay fuule nabadqaba.